# Qofka Martida ah ee Aad rabo Inaad Iska Rarto

**Guest Who Stay Too Long**

## Qof ma kula joogaa gurigaaga mana diidan yahay inuu kaa tago?

Ma jiraa qof gurigaaga kula jooga hadda oo aad dhib aad ka marayso sidii aad isaga diri lahayd? Waxaa laga yaabaa qofkaasi inuu yahay saaxiib ama qof ehelkaa ah oo dhibi haysto ama ilmo aad dhashay oo qaangaaray oo wali aan kaa tagin. Waxyaabahan soo socdaa waa kuwo aad tixgelin karto kolka aad go'aansanayso waxa aad ka yeelayso arrintan. Mar walba waxaa fiican inaad isku daydo inaad la tashato qareen waayo kiis walbaa xaaladiisu waa gaar.

**Ogow:** Hadii qofka kula joogaa uu naftaada khatar ku yahay ama aad ka cabsanayso inuu wax ku yeelo wac 911. Ka fakar inaad ka ka Qaadato Amar Maxkameed oo Amaan sii ah [Order for Protection (OFP)] ama Amar Khashkhasaad ka Deyn ah [Harassment Restraining Order (HRO)]. Eeg Xogta ururusan ee, *Amarka Amaan Helida iyo Amarka Khashkhashaada*.

## Isku ay inaad Hadal wax ku dhamaysaan

Isku day inaad ka wada shaqeysaan heshiis iyo waanwaan adiga iyo qofka kula joogaa. Hadii aad wada fariisataan oo ka wada hadashaan wixii jira, waxaa dhici kartaa inaad is af-garataan ama aad heshaan xal cid walba ay ku qanacso. Hadii aydnaan heshiis gaari karin, waa aad iska dhowri kartaa in bilayska iyo maxmakadi ay arrinta ku lug yeeshaan.



Waydii in qofka kula joogaa uu kaa tago. Qabso maalin siisa waqti uu ku diyaar garoobo uuna ku helo meel cusub oo joogo.

Hadii qofku uusan doonayn inuu baxo, ka fakar inaad siiso wax lacag ah si aad u caawiso hadii aad heli karto. Tani waxay u eg tahay waxaan macne sameynayn, laakiin hadii khasab kugu noqoto inaad maxkamad tagto si aad isgu daydo inaad iska saarto taasi waxa ay ku gelin kartaa kharash badan.

U sheeg qofka inaad isku dayeyso inaad ka caawiso inaan la xirin ama aan diiwaan loo gelin guri ka saarid.

Hadii aad heshiis gaartaan, waa inuu qornaadaa. Qor wax walba oo aad isku raacdeen si kolkaa aysan u jirin wax jaah-wareer ah ha dhow hadii qofka kula joogaa uusan heshiiska qaybtiisa ka soo bixin.

## Marti ama Qof Guriga wax ka degan?

Kiisaska qaarkood, qofka waxaa loo tixgelin karaa inuu yahay qof guriga wax ka degan. Xataa hadii aysan saxiixan liis ama aysan bixin wax kiro ah, waxa inuu noqon karaa qof guriga u degan sida sharcigu qabo.

Sharciga Minnesota waxa uu dhigayaa qofka guriga degani waa qof ku nool guri isagoo ogolaansho ka haysta mulkiilaha. Inta badan, laakiin mar walba aan ahayn, deganaantaa waxaa lagu bedeshaa kiro ama adeeg. Waxaa dhici karta inaad kireeye tahay laakiin aadan ogayn. Waxa sheega in qofka kula joogaa marti ama degani kan uu yahay:

- Ma leeyahay qofka kula joogaa meel kale oo u ah hoy joogta?
- Muddo intee la'eg ayuu qofku kula joogay?
- Ma u caawiyaa qofku qoyska, dhaqaale ahaan ama siyaabo kaleba?

**MUHIIM AH: hadii qofka martida ahi uu noqdo qof guriga wax ka degan, , waxa kaliya oo aad isaga rari kartaa adigoo dacwo guri ka saarid ka xareysta maxkamad.**

## Dadka aan guri wax ka deganayn: Sii Dadkaa Ogaysiis ka Dibna Wac Bilayska

Hadii qofka kula joogaa uusan guriga rasmi ugu noolayn, ayna diidaan inay baxaan, taa waxaa loo tixgelin karaa inay tahay seero goyn. Waa aad wici kartaa bilayska, laakiin waa ay adag tahay inaad u cadayso bilayska in qofka uusan hada wixii ka dambeeya uusan haysan ogolaansho ah joogitaan.



Waayo qofka kula joogaa waxa ay u badan tahay inuu markii hore guriga ku joogay ogolaansho uu adiga kaa haystay, waa ra'yi wacan inaad qorto ogaysiis oranaya, "waxa aan kaala noqonayaa ogolaanshihii aad guriga ku joogtay. Fadlan qaado alaabtaada igana bax [kuqor waqti macquul ah.]"

Qofka ka sii nuqul adiguna nuqul ka haysto ogaysiiska. Hadii qofka uusan maalintaa ogaysiiska ku qoran, waxa aad wiic kartaa bilayska waxa aadna waydiisan kartaa askarta inay qofka kaa saaraan iyadoo u tixgelinaa inuu yahay sero gooye. Waxa aad u haystaa ogaysiiska cadeyn ahaan in aad qofka ka codsatay inuu kaa baxo.

Hadii bilaysku ay qofka kula jooga kaa saaraan, waxaa diiwaanka u geli karta la xiritaan la xiray.

Waxaa iyana suurtagal ah inaysan bilaysku kaa kaxayn karin. Waxa ay oran karaan ma go'aansan karo in qofka kula jogaa sharcci-darro kuula jooga iyo in kale. Waxa ay kugu oran karaan maxkamadi waa in ay arrinta ay go'aamiso.

## Waydiiso Maxkamadda inay Kaa Rarto Qofka

Hadii aad doonayso inaad waydiisato maxkamad inay qof kaa saarto, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad cadeyso  in qofku aad doonayso in lagaa saaro uu yahay "degane" adiguna aad tahay "mulkiile." Waxaa inaad cadeyso waxyaabaha sida:


- Kiro aan la bixin
- In qofku ku jabiyey heshiiska liiska, ama
- Ay sii joogaan ka gadaal ogaysiiskii aad siisay ee joojinayey ogolaanshihii ay halkaa ugu noolaan karayeen.




Waxaa sidoo kale iyana sameyn kartaa inaad sheegato in qofku uu sharci-darro ku joogo meesha adigoon oranayn qofku guriga waa degan yahay.

Habka guri ka saaridu waxa uu qaadan karaa dhowr asbuuc ama xataa wuxuu qaadan kartaa dhowr bilood waxaana kaaga bixi karta kharash ah uu yaraan $285. Waa ra'yi wacan inaad hesho talo dhanka sharciga ah ka hor inta aadan ka xareysan dacwo guri ka saarid ah maxkamad.

Hadii uu dakhligaagu hooseeyo, waxa aad buuxsan kartaa foomka ka saamixida khidmada maxkamada si aad uga codsato in lagaa dhaafo bixinta khidmadaa. Maxkamada ayaa haysa foomkaa ama waxa aad ka sameysan kartaa mid khadka adigoo adeegsanaya wareysiga talaab-talaabda ah ee http://www.lawhelpmn.org/forms. *(ingiriisi kaliya)*

 → Riix **Court Fee Waiver** ***(Saamixida Khidmada Maxkamada)***

La imow cadeyn sheegaysa dakhligaaga yar, sida jeeg shaqo dabadii, cadeyn gargaar dowladeed inaad hesho ah.

## Waxaa jira arrimo dhanka sharciga ah hadii ay jiro xiriir mulkiile/kireste ah.

Magaalooyinka qaarkood, guri ma kireyn kartid hadii aadan haysan shatiga kirada. Waxa aad u baahan tahay caymis mulkiile guri oo gaar ah si aad u hesho kirestayaal. Ka hubi magaalada taa. Hadii aadan haysan waxyaabahaa laakiin lagaa rabo, waxa aad geli kartaa baxar. Waxaa dhici karta inaad u baahanto inaad la tashato qareen si aad u ogaato in sheegashada xiriirka mulkiile/kireste ay tahay ra'yi wacan iyo in kale.

Marmarka qaarkood, waxaa fiican inaad leedihiin xiriir mulkiile/kireyste. Marka horeba cadee waxa laga rabo labada dhinacba qorna dhamaan wixii heshiis ah.

Sida sharcigu qabo qolada gurigu waa inay siiso qofka ogaysiis muddo bil buuxda ah si uu u guuro. Hadii aan kiro la bixineyn, mulkiilahu waa inuu siiyo qofka 3 bilood oo uu ku guuro.

**Tusaale ahaan:** Hadii qofka kula joogaa uu ku siiyey bil karadeed Juun 1, waa inaad siisaa ogaysiis qoran ka hor Juun 30 keeda si ay u guuraan Luulyo 31 geeda.



Hadii qofka kula joogaa uu wali sii joogo ka dib Ogoosto 1, waxa aad xareysan kartaa dacwo guri ka saarid ah. Hadi aad dacwadaa ku guulaysato maxkamadu waxa ay soo Amar Guri soo Celin "Writ of Recovery."

Haddii qof diido inuu baxo, la tag Amarka maxkamadda xafiiska Shariifka ee degmadaadda. Shariifka ayaa kolkaa guriga iman oo qofka kaa saari. Xusuusnow, ka xareysiga dacwo maxkamadeed waxay u gelisaa fal guri ka saarid ah diiwaanka qofka. Tani waxa ay ka dhigtaa wax adag in qofku uu helo meel kale oo ku noolaado.

Kala har nuqulo dhamaan ogaysiisyada iyo heshiisyada aad l agasho qofka kula jooga si aad dacwadaada maxkamada uga cadeyso. Ka hor inta aadan dacwo maxkamad ka xareysan ku qor lambaro albaabyada qolalka si kolkaa shariifowgu uu ogaado  qaybta guriga ee qofka guriga laga eryayaa uu ku nool yahay. Waxaa dhici karta inaad u baahato inaad wacdo quful sameeye si aad u bedesho qufulada ka dib kolka bilaysku kaa saaro qofka.  Hadii aad qufulada bedesho ama aad alaabtooda aad dibada u dhigto ka hor inta aan bilaysku kaa saarin waa ay ku dacawayn karaan.

## Adiga kaligaa wax sameynta – "Iskaa-Isu-Caawin"

Bedelidda qufulka, ka jarida korontadda ama sameynta waxyaabo kale si qof guri looga saaro iyadoon la haysan amar maxkamadeed waa arrin khatar badan leh. Qolada guryaha ee Minnesota looma ogola inay isticmaalaan "iskood-isu caawin" si qof guri uga saaraan. **Waxa** aad qaabili kartaa dacwo maxkamadeed hadii qofka kula joogaa uu sheegto inuu guriga wax ka degan yahay. Hadii aad u diido in qofka kula joogaa uu alaabtiisa qaato ama ay wax ka xumaadaan alaabtiisa adigoo banaanka u dhigaya waa uu kugu dacaweyn karaa qofku taa.

## Su'aalo? La tasho Qareen

Hadii uu dakhligaagu yar yahay waxaa dhici karta inaad ka hesho gargaar dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah ama jaban xafiiska gargaarada sharciyada (legal aid). Ka wac xafiiska ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529. Haddii aad ku nooshahay Degmooyinka Hennepin, Ramsey ama Anoka, waxaad siddoo kale kala xiriiri kartaa Xiriirka Qareenadda Tabarucayaasha ah [Volunteer Lawyers Network (VLN)] barta https://www.vlnmn.org/ ama (612) 752-6677.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Haddii aadan xaq u lahayn caawinaad dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah ama jaban, waxa aad ka heli kartaa qareemo kale barta: www.mnfindalawyer.com.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**